WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27

OREGON AMNI AH OO XOOG (MARXALADDA II): ILAALINTA AMARRADA MUHIIMKA AH EE CAAFIMAADKA EE LA TACAALIDDA COVID-19, IYO WADITAANKA HIRGELINTA QAAB MARXALADO LEH OO DIB LOOGU FURO DHAQAALAHA OREGON

Ilaa iyo Jeenawari 2020, Gobolka Oregon waxa uu ku hawlanaa ka jawaab celinta halista caafimaad ee bulshada ee uu ku hayo coronavirus ka faafa ee cusub ee (COVID-19). Markii ay khatartu sii korodhay, jawaab-celinta Gobolka ayaa korodhay si looga hortago khatarta. Markii ay ahayd March 8, 2020, waxa aan ku dhawaaqay xaalad degdeg ah iyada oo la raacayo ORS 401.165 et seq., waxa aanan tilmaamay talaabooyin jawaab celin oo degdeg ah. Intaa ka dib, Ururka Caafimaadka Adduunku waxa uu ku dhawaaqay in faafitaanka COVID-19 uu yahay safmar caalami ah, isla markaana Madaxweynaha Mareykanka waxa uu ku dhawaaqay COVID-19 inuu yahay xaalad degdeg ah oo qaran.

Intii lagu jiray March iyo April 2020, markii coronavirus ku sii fidayey adduunka, waxa aan qaaday tallaabooyin isdaba joog ah oo aan ugu talagalay in lagu yareeyo faafitaanka COVID-19 gudaha Oregon, iyo in la yareeyo saamaynta dhaqaalaha iyo caafimaadka bulshada ee safmarka. Tallaabooyinkan waxaa ka mid aha laakiin aan ku xaddidnayn xaddidaadaha isku-imtaatinada; xidhitaanka dugsiyada; qaadista tillaabooyin lagu difaacayo dadka ku nool xaaladaha isku-raranka ah; ku dhawaaqista khalkhal suuq oo aan caadi ahayn; Mamnuucidda in isla goobta lagu isticmaalo cuntada iyo cabitaanka meheradaha cuntada ee gobolka oo dhan; hakinta howlaha waxbaritaanka ee shakhsi ahaaneed ee xarumaha waxbarashada sare; dalbashada dib u dhigista nidaamyada daryeelka caafimaad ee aan degdegga ahayn si loo ilaaliyo aaladda ka hortagga shaqsiyeed (PPE) iyo sariiraha isbitaalka; iyo in la soo rogo sharci ku meelgaadh ah oo reebaya guri ka saarida dadka iyo ganacsiga. Markay ahayd Maarso 23, 2020, waxaan ku amray reer Oregon inay "Stay Home, Save Lives," (Joogaan Guriga, Badbaadiyaan Nolol) ku hagayo shaqsiyaadka inay guriga joogaan illaa inta ugu badan oo suurtogalka ah, ku amrayo xiritaanka ganacsiyada tafaariiqda la gaareeyay, u baahan tallaabooyinka kala fogaanshaha bulshada ee xarumaha bulshada kale iyo xarumaha gaarka ah, oo ku soo rogayo sharuudaha aagaga banaanka iyo xarumaha daryeelka carruurta shatiyeysan.

Tallaabooyinkaasi waxa ay gacan ka geysteen ka hortagga iyo xakameynta faafitaanka COVID-19 gudaha Oregon. Sidaas darteed, dabayaaqadii April iyo horraantii May 2020, waxa aan bilaabay in aan qaado tallaabooyin lagu yareynayo xannibaadaha kor ku xusan, oo ay ka mid tahay oggolaanshaha dib-u-bilawga tartiib-tartiibta ah ee nidaamyada daryeelka caafimaad ee aan degdegga ahayn, dib-u-furista fursado madadaalo oo debedda ah oo cayiman, ogolaanshaha isku-imaatinada kooban, iyo fududaynta xayiraadaha ku saabsan daryeelka ilmaha iyo

ganacsiyada tafaariiqda qaarkood. Sida oo kale waxa aan saxeexay Amarka Fulinta, aniga oo ku hagaya Gobolka waa in uu qaadaa qaab hawleed, xog ururin, marxalado lehooloogu talagay gobolka si dib loogu furo hawlaha bulshada, dhaqaalaha, iyo howlaha kale ee Oregon.

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA LABAAD

In kasta oo kala fogaanta jidheed, Amarka "Joog Guriga, Badbaadi Nafaha", iyo tallaabooyinka kale ee muhiimka ah ee aynu kor ku soo sheegnay ay gacan ka geysteen yareynta fiditaanka COVID-19 gudaha Oregon, haddana Saraakiisha caafimaadka dadweynaha ee gobolka iyo kuwa maxalliga ah waxa ay ku talinayaan in fayrasku uu ku sii dhex wareegi doono bulshada dhexdeeda ayna filayaan in tirada kiisaska ay sii kordhaan marka xayiraadaha la qaado. Xitaa wadamada leh tiro yar oo kiisas ah ilaa hadda, khatarta faafitaanku weli way jirtaa. Fayraskan ayaa wali ah mid aad u khatar badan, faafitaanka adduunka ee coronavirus-ka cusubina waxa uu sii wadaa in uu si halis ah u khatar geliyo nolosha iyo caafimaadka dadka reer Oregon. Illaa iyo maanta, waxaa ka dhacay ugu yaraan 4,399 kiisas iyo 159 dhimasho gudaha Oregon, iyadoo in ka badan 100,000 oo dhimasho u keenay COVID-19 dalka oo dhan. Kiisaska COVID-19 ayaa laga helay dhammaan cidhifyada gobolka, maadaama fayrasku aanu aqoon wax xuduudo ah. Silsiladaha kaydka ee baadhitaanka iyo PPE ayaa wali ah mid aad muhiim u ah, awoodda Oregon ee baadhitaanka, raadinta qofka, iyo karantiilka kiisaska cusubina waxa ay u baahan yihiin horumar sii socda. Iyadoo ay jirto halista soo rogaalcelinta cudurka COVID-19 aan sii jiri doonto haddii tallaabooyinka dhawrista aan la joogteyn halkan Oregon, waa inaan joogteynaa diyaargarowga, marka aan wadno inaan fududeyno xannibaadahaan waqti kadib. Si fudud, shaqada adag ee xakameynta faafitaanka fayraska ee gobolka oo dhan waa in ay sii socotaa.

Waxa i dhiirrigeliyay shaqada adag ee taxaddarka leh ee gobollada, ganacsiyada iyo hay'adaha kale, iyo shaqsiyaadku ay ka qabteen agagaarka gobolka si hore loogu socdo hanaanka dib-u-furista ee leh marxaladaha, iyo in lala qabsado qaab cusub oo loo shaqeeyo. Maadaama oo aynu wadno in aynu hore u socono, nidaamkan dib-u-furiddu waa inuu isku dheelitiraa baahida loo qabo in la soo celiyo oo la xoojiyo wanaagsanaanta dhaqankeenna bulshada iyo dhaqaalaha iyo ka hortagga dib-u-soo-noqoshada COVID-19 kaas oo wiiqi doona natiijooyinka caafimaad ee muhiimka ah ee bulshada ee la gaadhay illaa iyo maanta. Hadafyada dib u furiddan waxaa ka mid ah yareynta isbitaal dhigidda iyo dhimashada; yareynta khatarta shaqaalaha safka hore; ka fogaanshaha nidaamyada caafimaad ee xad dhaafka ah; u oggolaanshaha dadka inay si amaan ah ugu laabtaan shaqada si ay u caawiyaan naftooda iyo qoysaskooda; ilaalinta dadka halista weyn ugu jira cudur daran, gaar ahaan bulshooyinka midabka leh; iyo taakuleynta isu imaatinada maxalliga ah ee yar yar ee dhawraya wadajirka bulshada iyo nashaadaadka dhaqaneed.

Guusha laga gaarayo dedaalada jawaab-celinta xaaladda degdega ah ee Oregon iyo dib u furitaanka marxaladaha leh waxay ku xidhnaan doontaa kartida loo-shaqeeyaha, shaqaalaha, iyo xubin kasta oo ka mid ah dadweynaha ba inay u hoggaansamaan tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha, amniga, iyo kala fogaanshaha jidheed. Shaqada adag ee reer Oregon ay qabteen ilaa iyo maanta si ay u toosiyaan qallooca waxay i siineysaa kalsooni ah inuu Gobolkeenu hore ugu socon karo si guul ah iyadoo la raacayo habka dib u furidda tartiibta ah.

Somali

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA SADDEXAAD

HADDABA SIDAAS DARTEED, WAXAA HALKAAN LAGU JAHEEYAY OO LAGU AMRAY IN:

Iyada oo la raacayo ORS 401.168, ORS 401.175, ORS 401.188, iyo ORS 433.441, waxaan amrayaa kuwan soo socda:

Qaab-dhismeedka loogu talogalay Dib-u-Furista Oregon Aamin ah oo Xoog leh

1. Amarkan Fulinta ayaa meesha ka saaraya oo beddelaya Amarka Fulinta ee 20-25, waxa uu dejinayaa shuruudaha aasaasiga ah ee lagu dabaqi karo gobolka oo dhan, waxana uu bixiyaa hanaan dib-u-furis oo maraaxil ah oo gobolka oo dhan ah iyo tilmaamo ku habboon Marxaladda I iyo Marxaladda II.

    a. Shuruudaha Aasaasiga ah. Amarka Wareegtadani wuxuu dejinayaa shuruudaha aasaasiga ah - tallaabooyinka ilaalinta gobolka ee muhimka ah - in ganacsatada Oregon iyo reer Oregon ay sii wadaan inay u hoggaansamaan, si ay u ilaaliyaan amniga bulshadeena oo ay u oggolaadaan hab-socodka marxallada dib-u-furidda si horay loogu socdo. Shuruudahan asaasiga ah ayaa lagu dabaqayaa gobolka oo dhan, marka laga reebo wax ka beddelada amarrada marxaladda dib-u-furidda iyo hagidda, ama sidoo kale wax laga beddelay sida lagu oggolyahay hoosta Amarka Wareegtadan.

    b. Marxalkada Dib u furidda Gobolku waa inuu qaato marxallada, xog-ururin ah, iyo habka loogu talogelay gobolka ee wax ka beddelka iyo fududeynta dheeraadka ah ee shuruudaha aasaasiga ah ee kor lagu soo sheegay, si dib loogu furo hawlaha bulshada, dhaqaalaha, iyo howlaha kale ee Oregon. Amarka Wareegtadani wuxuu dejinayaa hab-socodka marxallada kaas oo nolosha bulshada iyo dhaqaalaha Oregon ay si tartiib ah dib ugu furmi doonaan, oo ay kujirto shuruudda uu Gobolka u adeegsan doono qiimeynta in la fududeeyo ama la adkeeyo xayiraadaha, si reer Oregon loogu ilaaliyo amni. Habkaasi wuxuu usii mari doonaa saddex waji - Wajiga I, Wajiga II, iyo Wajiga III. Degmooyinka ayaa loo oggolaan doonaa inay kaga gudbaan marxaladaha tallaabooyin kala duwan.

c. Qaab-dhismeedka Amarka Wareegtadan Tuducyada 2–12 ee Amarka Wareegtadani wuxuu qeexaya shuruudaha aasaasiga ah ee lagu dabaqi karo, gobolka oo dhan, kahor inta degmadau ama Gobolku soo gaarin Wajiga I, oo uu sii wado codsashada illaa iyo inta laga beddelayo mooyee. Faqrada 2-10 ee Amarka Fulinta waxay qeexaysaa shuruudaha aasaasiga ah ee khuseeya, gobolka oo dhan, ka hor inta degmo ama Gobolku aanu gelin Marxaladda I, oo ay weli khusayn doonto illaa iyo inta laga beddelayo mooyee. Qaar ka mid ah shuruudahan aasaasiga ah ayaa wax lagaga beddeli doonaa Wajiga I, wejiga II, ama wejiga III sida ku qeexan faqradaha 11-24.

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA AFARAAD

Shuruudaha Aasaasiga ah.

2. Badbaadi Naftaada, Badbaadi Nolol. Ku ilaalinta bulshadeena amni iyo dib u-furitaanka dhaqaalaheena waxay ku xiran tahay dadka Oregon inay sii wadaan in ay u hogaansamaan shuruudaha muhiimka ah ee kala fogaanshaha jidheed iyo tallaabooyinka kale ee caafimaadka. Waxay muhiim utahay caafimaadka, badbaadada, iyo daryeelka Gobolka Oregon inta lagu gudajiro xaalada socota ee degdega ah eeshaqsiyaadku sii joogaan gurigooda ama gurigooda agtooda ama meesha ay degan yihiin, Markii ay suuragal tahay. Si taas loo gaadho, iyada oo la raacayo to ORS 401.168(1), ORS 401.175(3), ORS 401.188(2) to (3), and ORS 433.441(3):

   a. Shakhsiyaadku waa in ay sii wadaan u hogaansanaanta xayiraadaha la dabaqi karo ee isku-imaatinada. Faqrada 3aad ee Amarkan Fulinta waxa uu qorayaa xaddidaadaha isku-imaatinada aasaasiga ah. Xayiraadaha isku-imaatinada marxalada I waxa lagu qoray faqrada 15 (a), xayiraadaha isku-imaatanada marxaladda II na waxaa lagu qoray faqradda 20 (a).

   b. Shakhsiyaadku waa in ay u hogaansamaan awaamiirta caafimaadka dadweynaha ee lagu soo qoray amarradayda fulinta.

   c. , Shaqsiyaadku waa inay joogteeyaan ugu yaraan kala fogaan jidheed oo ah lix (6) fuudh oo laga fogaanayo qof kasta oo aan xubin ka ahayn qoyskooda, markay suurogal tahay, waana inay u hoggaansamaan wixii hagidda ee la dabaqi karo ee OHA, oo ay kujirto laakiin aan ku xaddidnayn kala fogaanshaha jidheed iyo daboolida wejiga. Hagida noocan ah waxaa laga heli karaa https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19.

3. Kulamada Marxaladda Koowaad. Isku-imaatinadu waxa ay keenayaan khataro gaar ah oo faafida COVID-19 ka ah, maadaama xidhiidhka joogtada ah ee lala yeesho kooxo waaweyn ay keento khatar dheeraad ah oo faafitaanka cudurka ah, haddii ay dhacdo in qof cudurka qabaa uu yimaado kulanka, waxa uu ka dhigayaa shaqadii raadinta qofka ee wax-ku-oolka ahayd ee degdega ahayd (gundhigga qorshayaasha dib-u-furista Gobolka) mid aad uga adag sidii hore. Sidaas awgeed Iyadoo la raacayo ORS 401.168(1), ORS 401.188(2), and ORS 433.441(3)(a), (b), (d) and (f):

a. Dhaqanada, Kulannada Madaniga, iyo Isu-imaatinka Ku saleysan Caqiidada. kulammada dhaqanka, bulshada, iyo isu imaatinka ku salaysan diinta ee dad ka badan 25 qof waa la mamnuucay. kulanada dhaqan, bulsho, iyo isu imaatinka ku saleysan diinta ee ah 25 qof ama in ka yar ayaa la oggol yahay oo keliya haddii masaafo dhan ugu yaraan lix (6) fuudh ay si joogto ah u ilaalin karaan inta u dhexeysa shakhsiyaadka ka kala imanaya qoysaska kala duwan.

b. Isu imaatinka bulshada iyo madadaalada Isu imaatinada bulshada iyo madadaalada ee ka baxsan guriga ama meesha la deggan yahay waxay sii ahaanaysaa mamnuuc, iyadoon loo eegayn cabirka, haddii aysan masaafada ugu yaraan lix (6) cagood ay si joogto ah u joogteyn karaan laga billaabo inta u dhexeysa shakhsiyaadka ka kala socda qoysaska kaladuwan, taas oo ay dhacdo in isu imaatinada bulshada iyo madaddaalada ee illaa toban (10) qof la oggol yahay. Isku-imaatinada madaddaalo iyo bulsheed ee ka badan 10 qof oo ka baxsan guriga ama meesha la deggan yahay waa mamnuuc. Isku-imaatinada Bulsheed iyo madadaalo ee 10 qof ama ka yar waxa kaliya la oggol haddii masaafadda ugu yaraan lix (6) fuudh ay isku jirsanayaan shakhsiyaadka ka soo kala jeeda qoysaska kala duwan.

c. Faqradda 3 ee Amarkan Fulintu ma khuseeyo keliya isku-imaatinada, mana khuseeyo goobaha shaqada, baananka iyo ururada daynta, kaalmaha shidaalka, huteelada ama albeerkooyinka, barnaamijyada hoyga, xarumaha daryeelka caafimaad, farmasiiyada, xarumaha daryeelka ilmaha, dugsiyada, xarumaha waxbarashada sare, dawlada maxalliga ah ama gobolka, ama ganacsiyo kale ama hawlo (tusaale ahaan tafaariiqda, ay ku jiraan bakhaarada booshariga ah) taas oo ku xidhan tilmaamaha kale ee Amaradayda fulinta ah ama hagaha OHA.

d. Guddoomiyaha Gobolka, ama OHA oo wata ogolaansha gudoomiyaha gobolku, waa uu beddeli karaa amarada faqradda 3-aad ee Amarka Fulinta, hadba sida loogu baahdo. Wax ka beddel kasta waxaa laga heli doonaa halkan https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19.

4. Xaddidaadaha Ganacsiga iyo Waaxyaha Gaarka ah. Iyada oo la raacayo ORS 401.168 (1), ORS 401.188 (1) illaa (3), iyo ORS 433.441 (3) (a), (b), iyo (f), meheradahu waa in ay u hoggaansamaan wixii hagitaan OHA ah oo la dabaqi karo, oo ay ku jiraan laakiin aan xaddidanayn hagidda loo-shaqeeyaha, iyo hagidda daboolida wajiga, oo wax laga beddeli karo wakhti ka wakhti. Intaa waxaa sii dheer, shuruudahan aasaasiga ah ee soo socda ayaa dabaqmaya illaa wax laga beddelayo Marxaladda I, Marxaladda II, ama meel kale:

a. Cuntada iyo Cabbitaanka

Marka lagu gudo jiro Marxaladda Gundhiga, Makhaayadaha cuntada, baararka, makhaayadaha baararka, baararka khamriga lagu sameeyo, baararka khamriga, kafateeriyada, hoolalka cuntada, dukaamada qaxwaha, naadiyada, ama xarumaha kale ee la midka ah ee bixiya cunto ama cabbitaan ma siin karaan ama uma oggolaan karaan ku isticmaalida cuntada ama cabbitaanka goobta dhexdeeda. Meelahani waxay bixin karaan cunto ama sharaab aan dhismaha lagu isticmaalayn (tusaale, cunto safaari ama baabuur ku qaadis) ama in qofka loogu geeyo meeshiisa. Meelaha bixiya adeegyadan oo kale waa inay fuliyaan nidaamyada kala fogaanta dadka oo ah ugu yaraan lix (6) fuudh oo u dhexeeya macaamiisha dalabka, sugitaanka, ama safka, si waafaqsan tilmaamaha hagaha OHA ee la dabaqi karo. Ganacsiyadu sidoo kale waa in ay waa inay fuliyaan nidaamyada kala fogaanta jidheed oo ah ugu yaraan lix fuudh marka la eego shaqaalaha, markasta oo ay suurtogal tahay. Wixii ah iibin sharaab alkahool leh oo bannaanka dhismaha lagu isticmaalayo waa inay waafaqsan yihiin ORS baabka 471 iyo wixii xeer la hirgaliyey intaa kadib.

(2) Faqradda 4(a)(1) ee Amarkan Fulintu ma khuseeyo xarumaha daryeelka caafimaadka, xarumaha daryeelka ilmaha, goobaha shaqada, dhismayaasha dawladda, xarumaha jawaab celinta xaaladda degdegga ah, barnaamijyada cuntada dugsiga ku salaysan iyo barnaamijyada hoyga iyo cuntada ee u adeega dadka nugul. Meelahan oo kale waxa lagu dhiirigelinayaa isticmaalidda kala fogaanta dadka, jadwallo kala duwan, cunto qaadasho, iyo tallaabooyin kale oo la mid ah si loo yareeyo halista la xiriirta faafidda COVID-19.

b. Tilmaamaha Qaybta u Gaarka ah. Waaxaha qaarkood oo cayiman ee dhaqaalaha Oregon waa in ay u hogaansamaan hagaha OHA ee la dabaqi karo, ee laga yaabo in wax laga badalo wakhti ka wakhti. Shardigan waxa ka mid ah bal se aan ku xaddidnayn ganacsiyada tafaariiqda ah; gaadiidka dadweynaha; beeraha xayawaanka iyo goobaha soo jiidasho ee debedda ah ee dayran; madxafyada; iyo hawlaha tababarka ciyaaraha (sida uu oggol yahay oo lana jaan qaadaya hagaha OHA ee la dabaqi karo).

c. Ganacsiyadu waa ay Xidhan yihiin inta lagu gudo jiro Marxaladda Aasaasiga ah. Iyada oo loo cuskanayo wixii isbeddello ah ee lagu sameeyo liiska soo socda (iyada oo loo marayo hagaha OHA, jihaynta Badhasaabka), hawlgalinta ganacsiyada soo socda, kaas oo xidhiidhka shaqsiyeed ee dhow ay adag tahay ama aan suurtagal ahayn in laga fogaado, ayaa wali ah mamnuuc inta lagu gudajiro Marxaladda Aasaasiga ah:

Jardiinooyinka madadaalada; barkadaha kalluunka; aargooyinka; rayiislayaasha iyo saaloonada timaha; goobaha ciyaarka boolka lagu ciyaaro; istuudiyeyaasha qoob-ka-ciyaarka; hawlaha qurxinta; xarumaha urureed ee walaalnimo; jiimamka iyo istuudiyeyaasha dhisnaanta jidheed (oo ay ku jiraan jiimamka fuulitaanka); baararka shiishada; suuqyada gudaha iyo bannaanka (tusaale ahaan., dhammaan qeybaha dhismaha tafaariiqda oo ay ku jiraan bakhaaro iyo makhaayado ku yaal hal aag); meelaha xafladaha bannaanka (oo ay ku jiraan jiimamka booditaanka iyo sumadda layserkagoobaha nafiska ee caafimaad, goobaha

nafiska ee qurxinta wajiga, goobaha nafiska ee maalineed, iyo adeegyada daaweynta duugista ee aan caafimaadka aheyn; saaloonada cidiyaha iyo hoodhinta; qolalka kaararka aan qabiil ahayn; garoonada lagu ciyaaro barafka; xarumaha waxqabadka sare; kalaabyada gaarka ah iyo kuwa bulsheed; Saaloonada tumashada / daloosashada jidhka; naadiyada teniska; tiyaatarrada; istuudiyaha yoga da iyo naadiyada dhalinyarada.

Faqrada4(c) ee Amarka Fulintaan ma quseeyo maqaayadaha, baararka, makhaayadaha baararka, baararka khamriga lagu sameeyo, makhaayadaha khamriga,kafateriyooyinka, hoolalka cuntada, dukaamada qaxwaha, ama xarumaha kale ee la midka ah ee bixiya cuntada ama cabitaanka, kuwaas oo wali ku xusan faqradda 4(a) Amarkan Fulinta. Moolalka gudaha iyo banaanka, iyo ganacsiyada kale ee ku xusan faqradda 4(c) ee Amarkan Fulinta, kama mamnuuc aha ka shaqeynta bixinta cuntada, khudaarta, daryeelka caafimaadka, farmasiiga caafimaadka, ama adeegyada dukaanada xayawaanka.

d. Wax ka beddelada.: Jihaynta Badhasaabka, OHA ama hayad gobol oo ku habboon oo kale ayaa bixin kara hagitaan u oggolaanaya mid ama in ka badan noocyada meheradaha ama xarumaha ku liistaysan faqradda 4 (c) in la furo, iyada oo qayb ka ah hanaanka dib-u-furidda marxaladaha leh ama si kale ah. Taa waxa dheer, jihaynta Badhasaabka, OHA waxa laga yaabaa in ay wax ka bedesho tilmaamaha faqradda 4 ee ka mid ah Amarka Fulinta, iyo tilmaamo kasta oo lagu xusay halkan, waxana laga yaabaa in ay abuurto tilmaame dheeraad ah iyo FAQ yo, hadba sida ay lagama maarmaan u noqoto. Dhamaam hagida la tixraacay, iyo wixii is bedel ah waxaa laga heli karaa https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19.

e. Natiijada u Hoggaansan-La'aanta: Ganacsiyada ku guuldareysta inay u hoggaansamaan shuruudaha la dabaqi karo ee faqradda 4 ee Amarkan Fulinta ayaa la xiri doonaa illaa ay muujinayaan u hoggaansanaanta.

5. Xadiddaadaha Goobta shaqada inta lagu gudo jiro Marxaladda Aasaasiga ah. Iyadoo la raacayo ORS 401.168(1), ORS 401.188(1) to (3), and ORS 433.441(3)(a), (b), (d) and (f):

a. Dhammaan ganacsiyada iyo hay'adaha aan macaash doonka ahayn ee ku leh xafiisyada Oregon waa inay u fududeeyaan shaqaalaha taleefanka iyo shaqada guriga ee loo-shaqeeyaha, ilaa inta ugu badan ee suurogal ah. Shaqada xafiisyada waa mamnuuc mar kasta oo wacyigelinta iyo ikhtiyaarrada guriga-ka jira la heli karo, iyada oo la raacayo waajibaadka booska, helitaanka qalabka is-gaadhsiinta, iyo ku-habboonaanta shabakadda.

Markay ikhtiyaarada shaqada fogaanta ah iyo shaqada guriga aan la heli karin, ganacsiyada iyo kuwa macaash la'aanta ku shaqeeyaaba waa inay u magacaabaan shaqaale ama sarkaal inuu dhiso, hirgeliyo, oo uu xoojiyo nidaamyada kala fogaanta jidheed, La jaan-qaadka hagaha OHA. Nidaamyada noocan oo kale ah waa inay wax ka qabtaan sida ganacsigu ama macaashku u sii wadi doono borotokoollada kala fogeynta bulshada ee booqdayaasha muhiimka u ah ganacsiga.

b. Ganacsiyada iyo hay'adaha aan macaash doonka ahayn ayaa ah inay raacaan hagidda OHA , oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidneyn hagida loo-shaqeeyayaasha. Sida uu jiheeyay Guddoomiyaha Gobolka, OHA waxaa laga yaabaa inay waqti waqti wax ka beddesho ama baahiso hagitaan cusub, hadba sida loogu baahdo.

c. Ganacsiyada iyo kuwa macaash la'aanta ku shaqeeya ee ku guuldareysta inay u hoggaansamaan faqrada 5 ee Amarkan Fulinta ayaa la xiri doonaa illaa ay muujinayaan u hoggaansanaanta.

6. Dhismayaasha Dowlada. Iyadoo la raacayo ORS 401.168(1), ORS 401.188(1) to (3), and ORS 433.441(3)(a), (b), (d) and (f):

a. Waaxda Adeegyada Maamulka (DAS) waxa loo habeeyay in ay soo saarto hagaha dhammaan xafiisyada iyo dhismeyaasha laanta fulinta ee gobolka, iyada oo ay ku xidhan tahay oggolaanshaha Badhasaabka. Hagaha waxa laga yaabaa in uu ku jiro, bal se aan ku xaddidnayn, tilmaamaha la xidhiidha hawlgallada dhismayaasha dowladda; bixinta adeegyada guud; shaqada masaafadda ah iyo ikhtiyaarada kasoo-shaqaynta-guriga; iyo tallaabooyinka kala fogaanta jidheed. Hagahaas, oo wax laga beddeli karo wakhkti ka wakhti, DAS ayaa la socodsiin doonta hay'adaha gobolka ee ay khusayso dadweynahana waxa ay ugu soo bandhigi doonaan https://www.oregon.gov/das/pages/coronavirus-state-gov-employee.aspx.

b. Faqrada 8 ee Amarka Fulintaan waxay quseeyaan dhammaan xafiisyada iyo dhismayaasha ay leeyihiin ama ay leeyihiin qeybta fulinta ee gobolka. Amarkan Fulinta ma quseeyo xafiisyada iyo dhismayaasha ay leeyihiin ama isticmaalaan waaxyaha sharci dejinta ee gobolka iyo laamaha garsoorka, dowladda federaalka, dowladaha hoose, iyo dowladaha qabaa'ilka.

7. Madadaalada Dibadda iyo Safarka. Iyadoo la raacayo to ORS 401.168(1) and (3), ORS 401.175(3), ORS 401.188(1) to (3), and ORS 433.441(3):

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA SAGAALAD

a. Shakhsiyaadka debedda way u bixi karaan nashaadaadyada madadaalada (socodka, laydhsiga, iwm.), laakiin waa inay ku xaddidaan nashaadaadkaas taabasho la'aan, waana laga reebay inay ku lug yeeshaan nashaadyada banaanka halkaasoo aysan suurtagal aheyn in la joogteeyo kala fogaanta jidheed, oo raacaan tilmaamaha OHA ee la dabaqi karo ee la xidhiidha hawlaha madadaalada ee dibedda. Maamulayaasha goobaha madaddaalada sidoo kale waa inay raacaan tilmaamaha OHA ee khuseeya. Sida uu jiheeyay Guddoomiyaha Gobolka, OHA waqti waqti ayay wax ka beddeli kartaa hagiddaas, hadba sida loogu baahdo.

b. Shakhsiyaadka waa inay sii wadaan yareynta safarka aan muhiimka aheyn, iyagoo raacaya wixii hagitaan OHA ah ee la dabaqi karo. Mar alla markii ay suurta gasho, dadka reer Oregon waa inay u safraan masaafada ugu yar ee muhiimka ah markay u socdaan ama ka socdaan guri, degmo, ama goob shaqo; helitaanka ama bixinta cuntada, hoyga, baahida macaamiisha, waxbarashada, daryeelka caafimaadka, ama adeegyada gurmadka; helitaanka ama wareejinta ganacsiga muhiimka ah iyo adeegyada dowladda; daryeelka xubnaha qoyska, xubnaha qoyska, dadka da'da ah, carruurta yar yar, ku tiirsanayaasha, dadka naafada ah, ama dadka kale ee nugul, xayawaanka rabaayadda ah, ama xoolaha; safarka sida ay farayaan saraakiisha dawlada, xoojinta sharciga, ama maxkamadaha; iyo hawlo kale oo dhaqaale, bulsheed, ama waxqabadyo madaddaalo ah oo ay oggol yihiin ama waafaqsan yahay amarradayda wareegto iyo hagida ee OHA.

c. Kaamamka gaarka loo leeyahay iyo kuwa dadweynaha ayaa furan kara haddii ay awoodaan in ay u hoggaansamaan hagaha OHA ee ku saabsan madaddaalada dibedda.

d. Waxaan u fasaxay Waaxda Baarkiyada iyo Madadaalada Oregon inay xiraan guri kasta ama xarun, markii fogeynta bulshada ee habboon aan la sii wadi karin.

e. Inta Lagu Jiro Marxallada Gundhiga ah, waa in ay xidhnaadaan dhammaan barkadaha dabaasha, garoonada barafka, garoonada isboortiga bannaanka, iyo aagagga qalabka ciyaarta. Sida uu jiheeyay Badhasaabku, OHA ama hay'ad kale oo dawladeed oo ku habboon ayaa bixin karta hagitaan oggolaanaya mid ama in ka

badan oo ah xarumaha noocan ah inay furmaan, iyaga oo qayb ka ah hanaanka dib-u-furis ee marxaladaha leh ama si kale ah. Hagida noocan ah waxaa laga heli karaa https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19.

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA TOBNAAD

8. Tacliinta Sare, iskuulada, daryeelka caruurta, barnaamijyada dhalinyarada. Gudoomiyaha wuxuu faray qeybaha waxbarashada gobolka inay kala shaqeeyaan iskaashatada dugsiga iyo la-hawlgalayaasha waxbarashada guud ahaan ee Oregon qorshaha dib-u-furista dugsiga, si ardayda Oregon ugu laaban karaan fasalka sannad dugsiyeedka 2020-2021, qaab nooc ah. Hay'adaha waxbarashada sare waxay sii wadi doonaan u hoggaansanaanta Amarka Wareegtada 20-09, oo ay ku jiraan kordhinta ama wax ka beddelida Amarrada Wareegtada ee dheeraadka ah, iyo hagitaan kasta oo laga helo Guddiga Isku-duwaha Tacliinta Sare. Goobaha daryeelka ilmaha, iyo fidin kasta ama xaddididda adeegyada daryeelka ilmaha, ayaa loo sii marayaa iyadoo la raacayo Amarka Wareegtada ee 20-19, oo ay ku jirto sida wax looga beddelay Amarrada Wareegtada ee dheeraadka ah, iyo hagitaan kasta oo ka socota Waaxda Waxbarashada, Qaybta Waxbarshada Hore, Xafiiska Daryeelka Ilmaha. Dugsiyada K-12 waxay sii wadayaan inay hoos imaadaan Amarka Wareegtada ee 20-20, oo ay ku jiraan kordhinta ama wax ka beddelida Amarrada Wareegtada ee dheeraadka ah, iyo hagitaan kasta oo ka socota Waaxda Waxbarashada. Haddii uu sidaas ku amray inuu sameeyo Guddoomiyaha Gobolka, OHA ama hay'ad kale oo dawladeed oo ku habboon ayaa bixin kara hagitaan dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada dhalinyarada, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn xeryaha xagaaga, bannaanka, iyo xeryaha xagaaga ee habeenkii.

9. Hagitaan. Jihayntayda, iyo maamulka hoos yimaad Amarrada Wareegtadan, OHA iyo hayadaha kale ee munaasibka ah ayaa soo saaray oo sii wadaya inay soo saaraan oo ay dib u eegaan hagitaan faahfaahsan oo ku saabsan dadweynaha, loo shaqeeyayaasha, iyo waaxaha gaarka ah ee dhaqaalaha Dhaqdhaqaaqa sii socda ee Oregon ee ku wajahan dib u furidda wuxuu ku tiirsan yahay dhamaan dadka Oregon oo sii wada raacida hagidda guud iyo waaxyaha qaaska ee OHA iyo gobolka kale. Dhaqdhaqaaqa sii socda ee Oregon ee ku wajahan dib u furidda wuxuu ku tiirsan yahay dhamaan dadka Oregon oo sii wada raacida hagidda guud iyo waaxyaha qaaska ah ee la dabaqi karo ee OHA iyo hay'adaha kale ee gobolka. Oregon waxay adeegsaneysaysa bartilmaameed, qaab ku saleysan sayniska si ay uga jawaabto xaalad degdeg ah ee socota ee COVID-19. Markaan sii wadnay inaanu baranno wax badan oo ku saabsan la-dagaallanka sheekada koronafayras, dadka Oregon waxay filan karaan in hagitaanku u baahan karo in wax laga beddelo waqti ka dib, si loo hubiyo jawaab-celin deg-deg ah oo wax ku ool ah. Si taas loo gaadho, haddii amar laga helo Guddoomiyaha Gobolka, OHA ama hayadaha kale, sida ku habboon, waxay

wax ka beddeli doonaan ama bixin doonaan faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mid kasta oo ka mid ah shuruudaha aasaasiga ah ee lagu qeexay tuduca 2 illaa 10 ee Amarka Wareegtada, hadba sida loogu baahdo, oo ku qasban inuu oggolaado Guddoomiyaha Gobolka. Wixii isbeddello ah iyo hagitaan dheeraad ah waxa ay heli doonaan dadweynuhu halkan https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19.

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA KOW IYO TOBNAAD

10. Amarka Fulinta ee 20-25 waa la laalay waxaana lagu beddelay amarrada ku jira Amaradan Fulinta.

Dibu-furista Qaab-dhismeedka Oregon

11. Marxalkada Dib u furidda Gobolku waa inuu qaato marxallada, xog-ururin ah, iyo habka loogu talogelay gobolka ee wax ka beddelka iyo fududeynta dheeraadka ah ee shuruudaha aasaasiga ah ee kor lagu soo sheegay, si dib loogu furo hawlaha bulshada, dhaqaalaha, iyo howlaha kale ee Oregon. Gobolku waa inuu qaado qaab marxaladaysan, xog ku socda, oo gobolka ku habboon marka la eego wax ka baddalidda iyo fududaynta shuruudaha aasaasiga ah ee sare ku xusan, si dib loogu furo hawlaha bulsheed, dhaqaale, iyo hawlaha kale ee Oregon. Qaabka dib-u-furista wuxuu dheelitirayaa natiijooyinka caafimaad ee muhiimka ah iyo baahida loo qabo dib u soo celinta iyo xoojinta badqabka bulshada iyo dhaqaalaha Oregon. Qaabka dib-u-furista wuxuu dheelitirayaa natiijooyinka caafimaad ee muhiimka ah iyo baahida loo qabo dib u soo celinta iyo xoojinta badqabka bulshada iyo dhaqaalaha Oregon.

12. Shuruudaha hore ee Galitaanka Marxaladda I. Amarada Marxaladda I ee ku qoran faqradda 15 ee ka mid ah Amarkan Fulinta waxa uu ka dhaqan galayaa dhamaan gobolka marka Oregon la timaado dhamaan shuruudaha hore ee Marxaladda I. Shuruudahan hore waa in uu xaddidaa Badhasaabku, isaga oo ku dhisaya talo soo jeedinta OHA, waxana ku jiri kara bal se aan ku xaddidnayn:

    a. Hoos udhaca faafinta COVID-19;

    b. Habka tijaabada ugu yar ee ku filan;

    c. Nidaamka raadinta xiriir ku filan;

    d. Xarumaha Takoorka/Karantiilka;

    d. Bixinta hagidda qaybta guud ee gobolka ee waaxaha Wajiga I;

    f. Awood Qaadista Daryeelka Caafimaadka oo ku Filan

    g. Siinta qalabka ilaalinta ee shakhsi ahaaneed oo ku filan.

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA LABA IYO TOBNAAD

13. Hannaanka Gudbitaankaee Gobolka oo dhan ee Marxaladda I. OHA waa in ay ogaysiisaa Badhasaabka marka shuruudaha hore ee gobolka oo dhan ee ku qoran faqradda 12 ee Amarkan Fulinta la helo, wakhtigan badhasaabku waxa uu go'aamin karaa in Marxaladda I uu dhaqan galay, si waafaqsan tilmaamaha ay soo saartay OHA. OHA waxay ogeysiin doontaa Guddoomiyaha marka shuruudaha guud ee gobolka ee ku xusan cutubka 14aad ee Amarka Wareegtada la fuliyay, waqtigaas oo uu Guddoomiyuhu go'aan ka gaari karo in Wajiga I uu dhaqan galey, iyadoo la raacayo tilmaamaha ay soo saartay OHA.

14. Hab-socodka loogu talogalay Kalaguurka Degmo Ahaaneed ee Marxaladda I. Xataa haddii Badhasaabku aanu soo saarin weli go'aan gobolka oo dhan ah sida ku xusan faqradda 13 ee ka mid ah Amarkan Fulinta, degmadu waxa laga yaabaa in ay raadiso ogolaanshaha Badhasaabka ee gudbitaanka Marxaladda I haddii degmadu la timaado dhamaan shuruudihii hore ee Marxaladda I, sida ku qoran faqradda 12 ee ka mid ah Amarkan Fulinta, iyo hage kasta oo la dabaqi karo oo ay soo saartay OHA. Xafiiska Badhasaabku waxa laga yaabaa in uu cayimo hanaanka ay degmooyinku uga dalbanayaan ogolaanshaha iyada oo la raacayo faqraddan. Mar alla markii gudoomiyuhu ogolaado codsiga qoraalka ah ee degmada, amarada Marxaladda I ayaa ka dhaqan galaya gobolkaas.

15. Amarrada Wejiga 1-aad Marka la eego Wajiga I-aad, iyo in kasta oo aan loo eegin shuruudaha aasaaska u ah ee ku xusan tuducyada 2- 11 ee Amarka Fulinta, kuwa soo socda ayaa loo oggol yahay degmo kasta oo wejiga 1aad dhaqangelisay, laakiin waa haddii degmadu kaliya iyo waxqabadyada la oggol yahay ay raacaan dhammaan hagidda lagu dabaqi karo wajiga I-aad ee ay soo saartay OHA. Marka la eego Wajiga I-aad, iyo in kasta oo aan loo eegin shuruudaha aasaaska u ah ee ku xusan tuducyada 2- 11 ee Amarka Fulinta, kuwa soo socda ayaa loo oggol yahay degmo kasta oo wejiga 1aad dhaqangelisay, laakiin waa haddii degmadu kaliya iyo waxqabadyada la oggol yahay ay raacaan dhammaan hagidda lagu dabaqi karo wajiga I-aad ee ay soo saartay OHA:

    a. Isku imaantinada deegaanka. Marka lagu daro kulammada lagu oggolaaday faqradda 3 ee Amarkan Fulinta, ashkhaastu waxa ay isugu iman karaan si maxalli ah ujeeddo walba iyaga oo ah kooxo ah illaa 25—oo ay ku jiraan isku-imaatino bulsheed ama madaddaalo oo hore ugu xaddidnaa 10 ama dad ka yar sida ku xusan faqradda

3(b) ee ka mid ah Amarkan Fulinta—inta masaafad ugu yaraan lix fuudh ah la joogtayn karo oo u dhaxaysa ashkhaasta ka timid guryo kala duwan. Safarka gudaha ee isu imaatinada noocan ah waa la oggolyahay. Marxaladda I, xaddidaadaha ku jira qayb-hoosaadkan ma khuseeyaan waaxyaha dhaqaalaha halkaas oo hagitaan gaar ah oo qaybeed uu khuseeyo (tusaale ahaan, makhaayadaha, ganacsiga daryeelka shaqsiyeed, iyo tafaariiqda), illaa iyo inta hagiddaas qaybta gaarka ah la raacayo. Qayb-hoosaadkan sidoo kale ma khuseeyo duruufaha ku qoran faqradda 3 (c) ee Amarkan Fulinta.

b. Waaxaha Dhaqaalaha Qaybaha soo socda dib ayaa loo furi karaa ama u balaadhin karaan howlaha, waa haddii ay ku shaqeeyaan si waafaqsan hagidda OHA ee Wajiga I-aad iyo dhammaan hagidda kale ee la adeegsan karo ee OHA:. Qaybaha soo socda dib ayaa loo furi karaa ama u balaadhin karaan howlaha, waa haddii ay ku shaqeeyaan si waafaqsan hagidda OHA ee Wajiga I-aad iyo dhammaan hagidda kale ee la adeegsan karo ee OHA:

(1) Meheradaha Cuntada iyo cabitaanka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn makhaayadaha iyo baararka adeegga cuntada leh, kuwaas oo ay tahay in ay la jaan qaadaan hagaha makhaayadaha Marxaladda I;

(2) Ganacsiyada daryeelka shakhsi ahaaneed iyo xarumaha, sida saaloonada iyo goobaha jimicsiga, oo ay tahay in ay u hoggaansamaan hagida adeegyada shakhsi ahaaneed ee Marxaladda I;

(3) Goobaha dukaamaysiga ee gudaha iyo banaanka ah, oo ay tahay in ay raacaan hagaha goobaha dukaamaysi ee gudaha iyo debeddaba ah ee Marxaladda I; iyo

(4) Waaxaha kale ee sidan oo kale ah Guddoomiyaha ayaa u aqoonsan kara inay u qalmaan dib u furid ama ballaarinta howlgalka inta lagu gudo jiro Wajiga 1.

16. Marxaladda kala guurka ee laga gudbayo Marxaladda I ee loo gudbayo Marxaladda II. Gobol iyo degmo kastaa midna kama gudbi karo Wajiga I umana gudbi Wajiga II ilaa ugu yaraan kow iyo labaatan (21) maalmood ay dhaaftay, si loogu oggolaado qiimeynta saameynta caafimaad ee bulshada ee kahor kala-guurka..

17. Waxyaabaha Aasaasiga ah ee looga baahan yahay Gelitaanka Wajiga II. Amarada Marxaladda II ee ku qoran faqradda 20 ee ka mid ah Amarkan Fulinta waxa uu ka dhaqan galayaa dhamaan gobolka marka Oregon ay la timaado dhamaan shuruudaha hore ee Marxaladda II, ka dib mudo aan ka yareyn 21 maalmood oo lagu jiray Marxaladda I. shuruudahan hore waa in uu xadidaa Badhasaabku, isaga oo ku dhisaya talo soo jeedinta OHA, waxana ku jiri kara bal se aan ku xaddidnayn:

a. Dhammaan shuruudaha aasaasiga ah ee lagaga gudbayo Marxaladda I, sida ku qoran faqradda 12 ee Amarkan Fulinta;

b. Dabagalka wakhtiyeed (raadinta qofka) ee boqollay cayiman oo kiisas cusub ah, 24 saacadood gudahood;

c. Boqollay cayiman oo kiisas laga helay oo cusub ah waa in loo raad-raacaa kiis jira; iyo

d. Ma jiraan wax korodh ah oo laxaad leh oo ku saabsan kiisaska cusub ama heerka dadka laga helay baadhitaankoooda.

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA AFAR IYO TOBNAAD

18. Hanaan loogu talagalay Gudbitaanka Gobalka oo Dhan Marxaladda II. OHA waa in ay ogaysiisaa Badhasaabka marka shuruudaha hore ee gobolka oo dhan ee ku qoran faqradda 17 ee ka mid ah Amarkan Fulinta la helo, wakhtigaan oo Badhasaabku laga yaabo in uu go'aamiyo in Marxaladdii II la dhaqan galiyey, iyada oo la raacayo hagaha ay soo saartay OHA. Isla marka Badhasaabku uu sameeyo go'aanka, amarada marxaladda II ee ka mid ah Amarkan Fulinta waa uu ka dhaqan galayaa gobolka oo dhan.

19. Hanaan loogu talagalay Gudbitaan Gobol Gaar ah Marxaladda II. Xataa haddii Badhasaabku aanu weli soo saarin go'aan gobolka oo dhan ah sida ku xusan faqradda 18 ee ka mid ah Amarkan Fulinta, degmadu waxa ay raadin kartaa ogolaanshaha Badhasaabka ee gudbitaanka Phase II, waana loo ogolaan karaa in ay sidaa sameeyaan haddii, ka dib mudo aan ka yareyn 21 maalmood oo degmadu ay gashay Marxaladda I, ay degmadu la timaado dhamaan shuruudihii hore ee Marxaladda II, sida ku qoran faqradda 17 ee ka mid ah Amarkan Fulinta, iyo hage kasta oo la dabaqi karo oo ay soo saartay OHA. Xafiiska Badhasaabku waxa laga yaabaa in uu cayimo hanaanka ay degmooyinku uga dalbanayaan ogolaanshaha iyada oo la raacayo faqraddan. Isla marka uu Badhasaabku ogolaado dalabka degmada ee qoraalka ah, ee aan ka horaynin 21 maalmood oo Degmadu gashay Marxaladda I, amarada Marxaladda II waa ay ka dhaqan galayaan degmadaas.

20. Amarada Marxaladda II. Marka la eego Marxaladda II, iyo in kasta oo aan loo eegin shuruudaha aasaaska u ah ee ku xusan faqradaha 2- 9 iyo faqradda 15 ee ka mid ah Amarkan Fulinta, kuwa soo socda ayaa loo oggol yahay degmo kasta oo Marxaladda II dhaqangelisay, laakiin waa haddii degmadu kaliya iyo waxqabadyada la oggol yahay ay raacaan dhammaan hagidda lagu dabaqi karo Marxaladda II ee ay soo saartay OHA:

    a. Xadiddaadaha Isku-imaatanada. Marka laga soo tago gundhigga iyo xaddidaadaha Marxaladda I ee faqradda 3 iyo 15 ee Amarkan Fulinta, marka lagu gudo jiro marxaladda II shakhsiyaadku waxa ay isugu iman karaan ujeeddo walba kooxo ka kooban illaa 50 goobaha gudaha ah, ama illaa 100 goobaha debedda ah, inta ay joogtaynayaan kala fogaanta jidheed oo ah ugu yaraan lix fuudh oo u dhexeeya ashkhaasta kuwaas oo aan ka iman guri isku mid ah. Marxaladda II, xadiddaadaha ku jira qayb-hoosaadkan ma khuseeyo waaxyaha dhaqaalaha halkaas oo hagitaan gaar ah oo qayb-gaar ah

ay khusayso (tusaale ahaan kuwa ku qoran faqrada 20(b)), inta hagahaa qaybta gaarka u ah la raacayo. Qayb-hoosaadkan sidoo kale ma khuseeyo duruufaha ku qoran faqradda 3 (c) ee Amarkan Fulinta.

b. Waaxaha Dhaqaalaha Qaybaha soo socda dib ayaa loo furi karaa ama u balaadhin karaan howlaha, waa haddii ay ku shaqeeyaan si waafaqsan hagidda OHA ee Wajiga I-aad iyo dhammaan hagidda kale ee la adeegsan karo ee OHA:. Waxa intaa u dheer waaxaha loo oggol yahay in ay ku shaqeeyaan gundhig jira iyo hagaha iyo tilmaamaha Marxaladda I, iyo in kasta oo ay jiraan wax amarro diidmo ah oo ku jira Amarka Fulinta, iyo iyada oo laga soo tagayo wixii tilmaamo ah ee ka soo horjeeda Amarkan Fulinta, waaxaha soo socda ayaa dib u furan kara ama sii ballaadhin kara hawlgallada, haddii ay ku shaqeeyaan si waafaqsan hagida la dabaqi karo ee OHA ee Marxaladda II ee qaybtaas loogu talagalay:

(1) Hawlgaliyeyaasha Goobaha iyo munaasabadaha, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn tiyaatarada iyo meelaha cibaadada, ayaa laga yaabaa in ay shaqeeyaan haddii ay u hoggaansan yihiin hagaha Marxaladda II ee OHA ee la dabaqi karo.

(2) Hawlaha madadaalada ee gudaha ah ee kharashkooda la bixiyey ee aan si kale loo cayimin (ciyaarta barafka, ciyaarta boolka, iyo ciyaarta arcades ka) ayaa laga yaabaa inay shaqeeyaan iyaga oo u hoggaansan hagaha la dabaqi karo ee OHA Marxaladda II.

(3) Hawlaha madadaalada ee debedda ah ee kharashkooda la bixiyey ee aan si kale loo cayimin (tusaale ahaan, doonyaha dheereeya, goolof yar, iyo ciyaarta shabagyada) ayaa laga yaabaa inay shaqeeyaan iyaga oo u hoggaansan hagaha la dabaqi karo ee OHA Marxaladda II.

(4) Barkadaha dabaasha iyo garoonada isboortiga waxa laga yaabaa in ay furaan, iyaga oo u hoggaansan hagaha la dabaqi karo ee OHA Marxaladda II.

(5) Meheradaha cunada iyo cabitaanka, oo ay ku jiraan bal se aan ku xaddidnayn makhaayadaha iyo baararka bixiya adeegyada cuntada, waxa laga yaabaa in ay fidiyaan adeega, iyaga oo u hoggaansan hagaha la dabaqi karo ee OHA Marxaladda II.

(6) isboortiyada Madadaalada ah, kuwaas oo laga yaabo in ay soo noqdaan si loo ciyaaro iyaga oo u hoggaansan hagaha la dabaqi karo ee OHA Marxaladda II.

(7) Waaxaha kale ee sidan oo kale ah Guddoomiyaha ayaa u aqoonsan kara inay yihiin kuwo u qalma dib u furid ama ballaarinta howlgalka inta lagu gudo jiro Marxaladda II.

c. Ku soo Noqoshada Xaddidan ee Shaqada. Iyada oo laga soo tagayo faqradda 5, ee sare, goobaha shaqadu waxa laga yaabaa in ay bilaabaan soo noqosho xaddidan oo shaqada xafiiska ah, inkasta oo shaqada fogaanta ah ay tahay weli mid lagu talinayo inta ugu badan ee la samayn karo. Goobaha shaqada eel eh shaqaale ku soo noqonaya shaqada waa in ay qorsheeyaan, ama ay sii wadaan qorshaynta, shaqaale ama qof xafiis ah si loo bilaabo, loo hawlgeliyo, oo loo xoojiyo nidaamyada kala fogaanta jidheed, iyaga oo u hoggaansan hagaha la dabaqi karo ee OHA. Nidaamyada noocan oo kale ah waa inay wax ka qabtaan sida ganacsigu ama macaashku u sii wadi doono borotokoollada kala fogeynta bulshada ee booqdayaasha muhiimka u ah ganacsiga.

d. Socdaal. Iyada oo laga soo tagayo faqradda 7(b), ee sare, ashkhaastu waa in ay u socdaalaan si ay uga qayb qaataan dhammaan arrimaha bulshada, magaalada, dhaqaalaha, madaddaalada iyo hawlaha kale ee loo ogolaaday gobolada ku jira marxaladda II.

21. Hagitaan. Iyadoo ku xiran oggolaanshaha Guddoomiyaha Gobolka, OHA (ama hay'ad kale, goorta uu hogaaminayo Guddoomiyaha) waxay soo saari doontaa hagitaan dib u furid. Hagiddan ayaa sahli karta oo wax ka beddeli doonta shuruudaha aasaasiga ah; dejinta shuruudaha Wajiga I, Wajiga II, ama Wajiga III; oo ay bixiyaan hagitaan kale oo guud iyo waax gaar ah. Hagaha waxa laga yaabaa in wax laga bedelo wakhti ka wakhti. Hagida noocan ah waxaa lagu dhigi doonnaa https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19.

22. Kala-guurka Isku daba xiga. Waxa aan filayaa in aan maamul goboleed iyo gobol hoosaad toona aan laga yaabin in uu ka gudbo Marxaladda II oo uu u gudbo Marxaladda III illaa iyo inta la heli karo daaweyn ballaadhan oo wax ku ool ah ama tallaal noqda mid la heli karo, ama isbedelo kale oo waaweyn oo ku yimaadda khatarta ka imanaysa safmarka soo baxay, sida uu go'aamiyey Badhasaabku. Si walba ha noqotee, waxa aan doonayaa in aan sii wado in aan kormeero horumarka Marxaladda II, si mudaysan si dib u eegis loogu sameeyo haddii lagu samayn karo wax ka bedel dheeraad ah hagaha iyo tilmaamaha Marxaladda II.

23. Shuruudaha Dib-u-Celinta Xayiraadaha Dib u furista Oregon waxay wadataa halista dib-u-soo-noqoshada COVID-19 oo laga yaabo inay ubaahantahay xayiraad dheeri ah, xitaa kadib marka gobolka ama degmooyinka shaqsiyadeed ay u gudbaan Wajiga I ama marxaladaha ku xiga. Dib u furista Oregon waxay wadataa halista dib u soo noolaynta COVID-19 oo u baahan kara xaddidaadyo dheeri ah, xitaa kadib marka gobolka ama degmooyinka gaar-gaarka ahi u gudbaan Marxaladda I ama Marxaladda II. Shuruudahan waxaa ka mid noqon kara laakiin aan ku xaddidnayn. Shuruudahan waxaa ka mid noqon kara laakiin aan ku xaddidnayn:

a. Aan awoodin buuxinta shuruudaha raadraaca u dhawaanshaha cid xanuunka qabta;

b. Caddaynta jiritaanka korodh COVID-19

c. Caddayn korodh culayska COVID-19-ka daran.

Haddii wax kamid ah shaxdan lagu xadgudbo, OHA waxay iskugu yeeri kulan degdeg ah saraakiisha caafimaadka dadwaynaha ee deegaanka si ay uga wada hadlaan qiimayn dheeri ahna loo sameeyo. OHA waxay markaa talo-bixin u soo jeedin doontaa Guddoomiyaha Gobolka, kaasoo leh awoodda uu ku go'aaminayo tallaabada muhiimka ah, iyo sidoo kale awoodda tallaabo lagu qaadi karo wakhti kasta.

24. Wax ka bedelka Marxaladda I ama Marxaladda II. Haddii uu ku amro inay sidaas sameeyaan Guddoomiyaha Gobolka, OHA ama hayadaha kale, sida ku habboon, waxay wax ka beddeli doonaan ama bixin doonaan faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mid kasta oo ka mid ah shuruudaha ku xusan tuducyada 13 illaa 21 ee Amarka Wareegtadan, hadba sida loogu baahdo, oo ay ku xiran tahay oggolaanshaha Guddoomiyaha Wax ka beddelo kasta oo sidan ah iyo hagitaanka dheeriga ah ba waxay dad-weynuhu ka heli doonaan halkan. Wax ka beddelo kasta oo sidan ah iyo hagitaanka dheeriga ah ba waxay dad-weynuhu ka heli doonaan halkan https://govstatus.egov.com/AMA-OHA-COVID-19.

Qodobbo Guud

25. Saamaynta Sharciga Wareegtadan waxa la soo saaray iyadoo la eegayo awoodda ay Badhasaabka siiyeen ORS 401.165 to 401.236. Sida ay sheegayso ORS 401.192(1), amarada ku qoran Wareegtadan waa inay noqdaan qaar si buuxda u dhaqangala, waana in wixii shuruuc, xeerar iyo amaro jira la hakiyo ilaa iyo xadka ay ka hor imanayaan shaqada awoodaha xaaladaha degdegga ah ee Badhasaabka. Sida ay sheegayso ORS 401.192(1), amarada ku qoran Wareegtadan waa inay noqdaan qaar si buuxda u dhaqangala, waana in wixii shuruuc, xeerar iyo amaro jira la hakiyo ilaa iyo xadka ay ka hor imanayaan shaqada awoodaha xaaladaha degdegga ah ee Badhasaabka.

26. Hirgelinta. Tilmaamaha Amarka Wareegtadan iyo hagitaan kasta oo ay soo saarto OHA ama ha'ayadaha kale ee gobolka si loo fuliyo Amarka Wareegtadan waxay ka dhaqangelaysaa gobolka oo dhan, haddii aan si kale loo cayimin. Wareegtadan waa sharci caafimaadka dadwaynaha ah, sida ku cad ORS 431A.005, waana mid la hirgalin karo sida lagu oggolaaday ORS 431A.010. Marka lagu daro ciqaabta kale ee lagu soo rogi karo iyada oo la raacayo shuruucda la adeegsan karo, qofkasta, meherad, ama shirkad lagu helo inay xadgudub ku sameysayAmarka Wareegtadan ama hagitaan kasta oo ay soo saarto OHA ama hayadaha kale ee gobolka si loo fuliyo Amarka Wareegtada waxay ku qasbantahay ciqaabta lagu tilmaamay ORS 401.990.

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-27
BOGGA SIDDEED IYO TOBNAAD

27. Darnaanta Haddii qayb, qayb-hoosaad, tuduc, tuduc-hoosaad, jumlad, jumlad gaaban, weedho gaaban,weedh kooban, ama eray kasta oo ka mida Amarka Wareegtadan sabab kasta oo ay u noqoto qalad, sida qabtay in ay ansax ahayn, burburiyaha sida ma saameyn doonaan ansaxnimada haray qaybo ka mid ah Amarkan. Haddii qayb, qayb-hoosaad, tuduc, tuduc-hoosaad, jumlad, jumlad gaaban, weedho gaaban,weedh kooban, ama eray kasta oo ka mida Amarka Wareegtadan sabab kasta oo ay u noqoto qalad, sida qabtay in ay ansax ahayn, burburiyaha sida ma saameyn doonaan ansaxnimada haray qaybo ka mid ah Amarkan.

28. Qadarin; Xaq Looma Laha Ficil. Amarka Wareegtadan looguma talogalin inuu abuuro, mana abuurin, xuquuq kasta oo qof, dan shakhsiyeed, ama dheef shaqsiyeed, ha noqoto mid ku saleysan qaab ama habraac, dhaqan gal ku ah oo lagu fulin karo sharciga ama sinnaanta koox kasta oo ka qayb ah Gobolka Oregon, wakaaladeeda, waaxyada, ama wax saraakiil ah, shaqaale ah, ama wakiillo ka ah. Amarka Wareegtadan looguma talogalin inuu abuuro, mana abuurin, xuquuq kasta oo qof, dan shakhsiyeed, ama dheef shaqsiyeed, ha noqoto mid ku saleysan qaab ama habraac, dhaqan gal ku ah oo lagu fulin karo sharciga ama sinnaanta koox kasta oo ka qayb ah Gobolka Oregon, wakaaladeeda, waaxyada, ama wax saraakiil ah, shaqaale ah, ama wakiillo ka ah.

29. Taariikhda Dhaqangalka:. Wareegtadan waxay dhaqangalayaa isla markaaba, wuxuuna dhaqangalkeedu soconayaa ilaa uu ka joojiyo Barasaabka Gobolka.

Waxaa lagu sameeyay Salem, Oregon, Maalintan 5aad ee June, 2020.

_____
Kate Brown
GUBANATORE

CADDAYN:

_____
Bev Clarno
XOGHAYAHA ARRIMAHA DIBADDA